



Xadidaadda cudurka kanonaha ee Kemi



Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto

24.5.-6.6.2021

Magaalada kemi wexey sii wadeysaa xadidaadda iyo la talinta cudurka koronaha, taas oo uu yoolu yahay in laga hortago ku faadidda cudurkan dadka deegaanka.

- **Kooxaha jimicsiga iyo hiwaayadaha, gudaha iyo goobaha furan ee dibadda**
- wixii ka yar 20 iyo carruuraha koox hiwaayadeedka leh ayaa loo ogolyahay iney ku hiwaayadeeyaan goobaha xiran ee sportiga. Carruurta iyo dhalinyarada ee ku jira jimicsiga waa in taxadar loogu lahaadaa, in dadka qaangaarka ah iyo waalidiintuba ineeyan ka soo qeybgalikaan isu imaatinka jimicsiga isla goobaha lagu jimicsanaayo, waxaa ka qeybgalikaan tawabarayaasha iyo hogaamiyayaasha kooxaha, waayo iyaga waxaa loo xisaabayaa ineey kooxda ka tirsanyihiin laakiin waalidiinta lama ogola ineey qeybka noqdaan.
- Goobaha xiran ee jimicsiga gabi ahaan wey ka xiranyihiin marka laga reebo 20 jirada iyo kooxaha kasii yaryar, iskuuleyda, iyo xirfadlayaasha sporti.
- Waxaa la ogolyahaya kooxaha dadka waaweyn ineey ku jimicsadaa goobaha furan ee lagu jimicsado, taas oo ay abaabyaan hay'adaha ka shaqeeyo arimaha sportiga. Howlahaas waxaa loo qabanayaa si waafaqsan ammaanka koronaha ee OKM iyo AVI oo igu ah wasaaradda waxbarashada iyo dhaqanka iyo hay'adda deegaanka.
- Waxaa la ogolyahay sidoo kale hiwaayadaha iyo xirfadlayaasha sporti ineey tartamo iyo jimicsi ku qabsan karaa goobaha xiran ee jimicsiga. Dhacdooyinka cayaaraha ama tartamada lama ogola ineey ka soo qeybgalaan daawadayaasha iyo in si taxadar leh loo ilaaliyo qawaaniinta cudurkan koronada.
- Hoolka dabaasha wexey ufurantahay macaamiisha ka waaweyn 65 sanadood. Macaamilka wuu inuu u cadeeyaa da'diisa kaasada ticket-ka laga qaatto. Dabaasha waa in dhamaan dadka oo dhami ay kala fogaadaan, ayna ilaaliyaan tilmaamaga arimahaas la xiriira. Hoolka dabaasha wuu ka xiranyahay dadyow kale.



Vipuvoimaa
EU:lta
2014–2020



Madbacadda, Muusio, iyo xarumaha dhalinyarada

- Madbacadda, farshaxanka iyo museo-ga taariikhda intuba waa ay furanyihiin. Qeybta wax aqriska ee macbadda markastaa iyadu wey xirantahay. Dhamaan shaqooyinkaas oo dhan wey imaanayaan iyadoo la ilaaliyey qawaaniinta, xadidaadda isu imaatinka konaha iyo waliba talooyinka arinkaasi la xiriira, tusaale ahaan, gamcaha oo wanaagsanaada iyo qaab u qunfacidda wanaasan, iyo kala fogaansho. Waxaa sidoo kale wali taagan in lagu talinayo xirashada maaskarada.
- Goobaha dhalinyarada wey furanyihiin, goobahaasi waxaa imaan kara qiyaasti kala bar dadkii imaan jiray sidii hore ee narmal-ka ahayd. Xarumahaasi dhalinyada waa in lagu isticmaalaa maaskaro, nala ilaaliyaa kala fogaanshaha.

Xadidaadda isu imaatinka wexey soconeysaa 6.bisha lixaad sida ay go'aamisay hay'adda AVI

- Kulamada iyo isu imaatinada waa in la dhowraa xeerrarka hay'adda (Lapin Aluehallintoviraston) ee ku qodobaysan (LAAVI/750/2021), iyadoo nidaamkan la maraya ayaa kulamada la qabsan karaa, laakiin waa in aad loo aqriyaa qodobadan arinkaas la xiriira.
- Hay'adda Lapin aluehallintovirasto wexey mamcuuneysaa dhamaan isu imaatinada goobaha banaani yo kuwa xiran ineey kasoo qeybgalaan dadyow badan oo daawasho iyo kulmado is dhaxgal ku sameynaya goobahaasi, kuwaas oo cadadkoodu ka badan 10 qofood waa mamnuuc. Goobaha xiran iyo kuwa furanba waa la imaan karaa hadii dadka imaanaya ama kasoo qeybgala ay ka yaryihiin 10 qofood, waxaana usii dheer iyadoo loo eegayo ilaalinta qabaaniinta iyo xeerarka koronaha ee wasaaradda waxbarashada iyo dhaqanka iyo hay'adda caafimaadka guud ee, qaranka.

Xarumaha xanaanada, iyo xanaaneynta waa la booqan karaa

- Waa suurtoagal in la buuqdo dadka degan guryaha xanaanada dadka waaweyn iyadoo la ilaalinayao xeerka ammaanka, kala fogaanshaha codorkan, afkana la xiranayo.
- Kulamada iyo balamada waa ay qabsoomayaa iyadoo goor sii horeyso aad soo wargalineyso shaqaalaha xarunta, una sheegeyso inaad soo socotto wakhtigaas. soo booqdayaasha wexey noqon karaa ugu yaraan laba qof. Wakhtiga booqashada ay socoto waa inaad isticmaashaa maaskaro, waana inaad ka taxadartaa kala fogaanshada, waana inaad nadiifisaa gacmahaaga.

Talooyinka iyo timaamaha kale

- Mamnuuc koox dad ah iyo kulamada maalaayacniga ah. Kataxadar kala fogaanshaha isticmaalna maskarada xaadka iyo meelkastaa oo aad joogto, taasoo xattaa laga yaabo ineey adagtahay in lagu kala fogaado, ilaali nadaafadda gacmahaaga iyo qaab uqunfadidaada, ha aadain hana usafrin goobaha cudurka ku badanyahay sida dalka Iswidan.
- Dalbo baaritaan korona dhaqsi, hadii aad qaaday xanuunkas.
- Talooyinka iyo xaddidaadaha la bixiyay waxay ku saleysan yihiin xaaladda cudurka, qawaaniinta u degsan Hay'adda Maamulka ee Gobolka iyo soojeedinta Kooxda Kahortagga xanuunada faafa ee gobolkan galbenka ku yalla.



Vipuvoimaa
EU:lta
2014–2020